

Heerarka Aasaaska u ah Tayada ee
Barnaamijyada Waxbarashada Caruurta
(WAC Cutubka 110-300)

Buuga tilmaanta
Waxaa dib loo saxay 03/2020



WASHINGTON STATE
Department of
Children, Youth, and Families

MAHADNAQ

Shaqsiyaad badan ayaa gacan kagaystay abuurista buugaan tilmaamaha ah. Waxaan uga mahadcelinaynaa shaqsi kasta oo kamid ah dadka soosocda doorkey kaqaateen arintaan:

Angela Abrams, *Eligibility and Provider Supports Division (Qaybta Uqalmida iyo Taageerida Adeeg bixiyaha), Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Caruurta, Dhalinta, iyo Qoysaska)*
Amy Agnello, *Licensing Division (Qaybta Shatiyaynta), Department of Children, Youth, and Families*
Lori Anderson, *Administrative Services Division (Qaybta Adeegyada Maamulka), Department of Children, Youth, and Families*
Luba Bezborodnikova, *Licensing Division, Department of Children, Youth, and Families*
Rachael Brown-Kendall, *Eligibility and Provider Supports Division, Department of Children, Youth, and Families*
Judy Bunkelman, *Licensing Division, Department of Children, Youth, and Families*
Harriet Dichter, *Lataliye*
Amanda Dunlap, *Public Consulting Group (Ururka Latalinta Bulshada)*
Heather Gann, *Public Consulting Group*
Debbie Groff, *Licensing Division, Department of Children, Youth, and Families*
Jody Hitchings, *Licensing Division, Department of Children, Youth, and Families*
Kandi Latimer, *Licensing Division, Department of Children, Youth, and Families*
Nicole Lor, *Early Learning Programs Division (Qaybta Barnaamijyada Waxbarashada Dhalaanka), Department of Children, Youth, and Families*
Heather Moss, *Department of Children, Youth, and Families*
Deborah O'Neil, *Licensing Division, Department of Children, Youth, and Families*
Michelle Roberts, *Eligibility and Provider Supports Division, Department of Children, Youth, and Families*
Diana Stokes, *Eligibility and Provider Supports Division, Department of Children, Youth, and Families*
Brenda Uncangco, *Licensing Division, Department of Children, Youth, and Families*
Amy Wakefield, *Licensing Division, Department of Children, Youth, and Families*
Hallie Wells, *Public Consulting Group*
Jodi Whiteman, *Public Consulting Group*

AFEEF

Macluumaadka kujira buugaan tilmaamaha ah waxaa kaliya loogu talagalay sababo macluumaad kaliya. Macluumaadka looguma talagalin inay noqdaan isha laga qaadanaayo fikirka rasmiga ah ee xeerarka shati bixinta ama talo dhanka sharciga ah. Qofkasta wuxuu masuul kayahay inuu barto oo uu fahmo xeerarka iyo sharciyada hadda kajira Gobolka Washington. Sharciyada iyo xeerarka hadda jira ee daryeelka caruurta waxaa laga heli karaa cutubyada 43.216 RCW, 110-300A WAC, iyo 110-300B WAC. Cutubka 110-300 WAC wuxuu dhaqan galayaa bisha Agoosto 1, 2019.

LIISKA MAWDUUCYADA BUUGGA



QAYBTA KOOWAAD: DULMARKA ISKUDABAQIDA

ISKUDABAQIDA.....	3
Sawirka Dulmarka Iskudabaqida.....	4
Taariikhda Qaabaynta Heerarka.....	5
Mabaadii'da Iswaafajinta heerarka.....	10
Iskaashiyada iyo Hormarinta shaqada: Licensing, Early Achievers, Early Childhood Education iyo Assistance Program.....	12



QAYBTA LABAAD: DULMARKA WAXBARASHADA

Qaybta Labaad:	16
Dulmarka Waxbarashada.....	16
Sawirka Dulmarka Waxbarashada.....	18
Daadajinta Shatiyaynta Heerarka Aasaaska u ah Tayada	23
Iskuxirnaanta.....	25
Lana ilaaliyaa ujeedada.....	27
Kala duwanaanshaha iyo Kadhaafida shuruudaha	29
Hormarinta Xirfada, Tababarka iyo Sharuudaha.....	32



QAYBTA SADDEXAAD: DULMARKA ISGAARSIINTA

ISGAARSIINTA.....	52
Sawirka Dulmarka Isgaarsiinta	53
Kajawaabida Su'aalaha	54
Tababarada iyo Macluumaadka Wacyi galinta Heerarka Iswaafajinta.....	56
Iskaashiyo Wadashaqayneed.....	57
Waqtiga Waxbarashada Deep Dive	58



QAYBTA AFARAAD: ILAHA MACLUUMAADKA

ILAHA MACLUUMAADKA.....	66
Sawirka Dulmarka Ilaha Macluumaadka.....	67
Dadaalada DCYF ee kadhaha Sharci Samaynta Laga Tashtay.....	68
Waxay sharaxaad gaar ah kabixinaysaa Heerarka Aasaaska u ah Tayada.....	72
Mawduuca Heerarka Aasaaska u ah Tayada ee La cusboonaysiiyay	73
Heerarka Aasaaska u ah Tayada e Cusub.....	74
Shaxda Go'aanka Agaasimaha	75
Daraasada Saamaynta Ganacsiyada yaryar ee Dhaqaaluhu kuleeyihiin Heerarka Aasaaska u ah Tayada.....	78

Qaybta Koowaad: Dulmarka Iskudabaqida

Sawirka Dulmarka Iskudabaqida

Iskaashi dhanka Shati bixinta, Early Achievers iyo Early Childhood Education and Assistance Program (ECEAP, Barnaamijka Waxbarashada iyo Caawimaada Caruurta yaryar) oo labilaabay 2015 kaasoo lagu ansixiyay sharciga taariikhiga ah ee Bilaabida Early Start Act (Sharciga Waxbarashada Caruurta yaryar) ee gobalaka Washington. Sida uu qabo Sharciga Early Start Act, qodobada heshiiska waxaa ku jirta 1) cusbooneysiinta Shatiga, sharuudaha Early Achievers iyo ECEAP iyo 2) aasaasida hormarinta heerarka iyo sharciyada u dhaxeeyo daryeelka caruurta ee shatiyeysan, Early Achievers iyo ECEAP.

Department of Children, Youth, and Families (DCYF) ayaa dajisay mabaadii da hagitaanka si lootaageero heshiiska, iyo adeeg bixiyaasha kulugta leh, qoysaska iyo dadka kale ee doorka aasaasiga ah kuleh hanaanka waxbarashada dhalaanka si dib looga shaqeeyo heerarka shati bixinta, Early Achievers iyo ECEAP. Waa hanaan daba dheer oo socday lagasoo bilaabo 2015 ilaa 2018 kaasoo ay kaqayb qaateen kumanaan kaqaybgalayaal ah.

Sharciga Early Start Act wuxuu siiyay awooda biloowga heerarka heshiiska, kaasoo keenay in isbadelo lasameeyo kuwaasoo taageero kagaysta iskuxirka udhaxeeya gurigga qoyska iyo shuruucda xarunta shati bixinta, meeshana kasaaraysa kaladuwanaanshiyaasha aan muhiimka ahayn iskuguna gaynaysa labo cutub oo kaladuwan oo dhanka shatiyada ah hal cutub iyo sidoo kale abuurista kobcinta hanaanka shati bixinta ee Early Achievers iyo ECEAP. Isla xiligaas, hanaankaan wuxuu xoojiyay heerka shati bixinta oo aasaas u ah kobaca caruurta, caafimaadkooda iyo badqabkooda. Isbadelada ayaa sidoo kakooban natiijooyinka dib u eegis iyo taxliilin lagu sameeyay shuruudaha cusub ayadoo laraacaayo sharciga federaalka ee daryeelka caruurta iyo aasaasiyaadka DCYF ee dhinacyada sinaanta isirka, ilaalinta dhaqanka, badqabka iyo caafimaadka bii'ada caruurta.

Lagasoo bilaabo maalintii koobaad, ayadoo lagu bilaabaayo shaqada dad badan oo hormariyay gacana kagaystay ansixinta Early Start Act, ilaa sanadihii lagu jiray diyaarinta soosaarista heerarka casriga ah ee shati bixinta, hanaankaan wuxuu usahlay adeeg bixiyaasha noockasta, waalidiinta, dadka kuhawlan shaqada, iyo shaqaalaha shati bixinta inay si wadajir ah ushaqeeyaan ayna si wadajir ah wax ubartaan ayagoo kaashanaaya heerarka shati bixinta oo kama danbays ah kuwaasoo looqorsheeyay in ladahaqan galiyo bisha Agoosto 2019.



Taariikhda Qaabaynta Heerarka

Sanadkii 2015, baarlamaanka ayaa ansixiyay sharciga Early Start Act, kaasoo gudoomiyaha gobalku saxiixay. Markay ansixinayeen sharciga Early Start Act, xubnaha baarlamaanku waxay sidoo kale fursad siiyeen dhamaan caruurta inay dugsiga yimaadaan ayagoo waxbarasho diyaar u ah; in qoysasku kabaxaan xeendaabka fakhriga; iyo bulshooyinku gurtaan miraha abaalmarinada iyo natijada maalgashiga aan ognahay inuu ka imaanaayo waxbarashada caruurta oo tayo sare leh. Sharcigaan wuxuu dhiirgalinayaa awood lagu abuuraayo barnaamijyo cusub iyo hormarino shaqada Waaxda hadda looyaqaano Department of Children, Youth, and Families (DCYF), horayna loo oran jiray, Department of Early Learning (DEL, Waaxda Waxbarashada Caruurta).



Sharciga Early Start Act waa sharci balaaran oo ay kujiraan laga sharuudaha laga doonaayo in DCYF ay dhamaystirto. Sharciga Early Start Act wuxuu doonayaa:

- Abuurista hal unug oo heerar ah oo loosameeyo barnaamijka Licensing and Early Childhood Education and Assistance Program (ECEAP, Barnaamijka Shatiyada iyo Waxbarashada Caruurta iyo Caawimaada) ayadoo la adeegsanaayo Early Achievers oo yool unoqonaaya tayada;
- Xeelado si loo xaqiyo in barnaamijyada waxbarashada caruurta yihiin kuwo laheli karo, taageero leh kuna haboon bulshooyinka kaladuwan ee kudhaqan gobalka oo dhan, waxna kaqabta caqabadaha kajira kaqaybgalkiisa;
- Hawlgalinta Early Achievers heerka 3-5 marka lagaaro sanadka 2020 kaasoo ay kudhaqmayaan dhamaan daryeel bixiyaasha caruurta ee shatiga lasiiyo oo u adeegga caruurta-aan wali gaarin da'da dugsiga ee kujira barnaamijka caawimaada;
- Helitaanka ECEAP oo ay helaan dhamaan caruurta uqalma marka lagaaro sanad dugsiyeedka 2020-21;
- Bixinta barnaamijka ECEAP ee nus-maalinta ah, maalinta-dugsiga-ee buuxda, iyo maalinta-saacadaha dheeriga ah lagu daro ayadoo laga fiirinaayo baahiyaha adeegyada iyo helitaanka shaqada;
- Dhaqan galinta Early Achievers heerka 4-5 marka lagaaro bisha Maarso 2016 ama in labilaabo nashaadaadka kaalmaatiga ah bisha Sebteembar 2016 si looqiimeeyo heerka 4; iyo
- Dhaqan galinta ogolaanshaha 12-bilood ee caawimaada Working Connections Child Care (Iskuxirka Shaqada ee Daryeelka Caruurta) si kor loogu qaado sugnaanta iyo daryeelka tayada-sare leh ee caruurta-danyarta ah.

Shaqada looga guul gaaraayo heerar halka unug isku ah dhinacyada Shati bixinta, Early Achievers, iyo ECEAP waxaa loo yaqaanaa "isku aadinta heerar." Buugga tusmadu wuxuu diirada saarayaa isbadalada lagu sameeyay Shatiyaynta taasoo qayb ka ah hanaanka isku aadinta heerar, laakiin isku aadinta heerar ku way ka balaaran yihiin kaliya Shatiyaynta. Isku aadinta heerar waa hanaan sanado badan soconaa kaasoo soo biloowday sanadkii 2015 Sida uu qabo Sharciga Early Start Act, qodobada heshiiska waxaa ku jirta 1) cusbooneysiinta Shatiga, sharuudaha Early Achievers iyo ECEAP iyo 2) aasaasida hormarinta heerar iyo sharciyada u dhaxeeyo daryeelka caruurta ee shatiyeysan, Early Achievers iyo ECEAP. Sida uu hiigsigu kuqeexay Sharciga Early Start Act, isku aadinta heerar waxaa diirada lagu saarayaa xaqiijinta in hanaanka waxbarashada dhalaanku uu yeesho xeerar midaysan kuwaasoo ay fududahay in ay fahmaan adeeg bixiyaasha xarumuhu, abuurayana hormar qeexan oo iskuxiraaya heerar Shatiyaynta, Early Achievers iyo ECEAP.


Isku aadinta heerar waxaa loogu talagalay in lagu taageero daryeelka caruurta oo tayo sare leh loona fidiyo caruurta reer Washington. Diirad saarida isku aadinta heerar ee dhanka luuqad qeexan oo rasmi ah waxay kor uqaadaysaa hufnaanta, waxay meesha kasaaraysaa labo wajilaynta, waxayna abuuraysaa yool guud oo ay yeeshaan adeeg bixiyaasha, shati bixiyaasha iyo waalidiintu. Isku aadinta lafteedu— heerar la iskuxiray ee Shatiyaynta, Early Achievers iyo ECEAP—waxay gacan kagaysanaysaa in adeeg bixiyaashu kobciyaan tayada barnaamijka ayna buuxiyaan baahiyaha qoysaska kaladuwan. Natijada kadhatala isku aadinta heerar awgeed, waa wax fudud ah in macluumaadka lala wadaago qoysaska ayadoo looga waramaayo tayada barnaamijka, taasoo kacaawinaysa arkida iyo doorashada waxa ugu haboon caruurtooda.



Laga bilaabo sanadkii 2015, DCYF waxay lashaqaynaysay adeeg bixiyaasha iyo qolyaha kalaba, ayna kujiraan qoysaska caruurta, kuwaasoo aasaasi u ah shaqadaan. Qolyo badan oo kulug leh hanaanka waxbarashada caruurta yaryar ayaa qayb ka ah qabashada shaqada si la iskuwaafajiyo loona cusboonaysiiyo heerar barnaamijka. Soojeedintooda iyo khibradooda ayaa muhiim u ah qaabaynta isbadalada lagu sameeyay Shatiyaynta, Early Achievers iyo ECEAP si guud, si gaar ahna isbadalada lagu sameeyay Shatiyaynta kuwaasoo dhaqan galaaya bisha Agoosto 1, 2019.

Jaangoynta waqtiga ee hoos kuqoran ayaa macluumaad kabixinaysa dhamaan arimaha laxariira iswaafajinta, kuwaasoo laxariira arimaha Shatiyaynta ee hanaanka iswaafajinta heerar.

SAWIRKA 1.1 JAANGO'A WAQTIGA ISWAAFAJINADA



Dhamaan intuu socodo hanaanka iswafajinta heerarku, labo kooxood ayaa door muhiim ah kaciyaaray shaqada. Sanadkii 2015, DCYF waxay abuurtay Gudi Hoosaad Hawsha fuliya kaasoo hagaaya shaqadaan iyo sidoo kale Statewide Advisory Committee (Gudigga Talobixinta heer Gobal), kaasoo kakooban qolyaha kulugta leh shaqada.


Gudigga Hagida, oo kakooban shaqaalaha gobalka, ayaa hagaaya horyaalna u ah shaqada kasocota dawlada gobalka.

Gudigga Talobixinta Gobalka oo dhan wuxuu fikrado iyo khibrado joogto ah kusiyaadinayaa shaqada. Waa koox kakooban shaqsiyaad kaladuwan iyo ururo matalaaya adeeg bixiyaasha nooc kasta, ayna kujiraan qoyska iyo xarunta, wakiilo kasocda Head Start (Madaxa Gobalka), Barnaamijyada Early Head Start iyo ECEAP, adeeg bixiyaasha Montessori, iyo adeeg bixiyaasha degmooyinka dugsiga. Kaqaybgalayaasha kale waxaa kujira wakiilada maxaliga ah ee SEIU 925, Child Care Aware of Washington (Wacyi Galinta Daryeelka Caruurta ee Washington), Childcare Quality and Early Learning Center (CQEL, Xarunta Tayada Daryeelka Caruurta iyo Waxbarashada Caruurta), ururada udooda daryeelka caruurta sida One America, Children's Alliance (Isbahaysiga Caruurta), Washington State Association (Uruurka Gobalka Washington) ee Head Start iyo ECEAP, Educational Service Districts (Adeegyada Waxbarashada ee Degmooyinka), regional Early Learning Coalitions (Isbaaysiyada Waxbarashada caruurta ee Gobalka), ururada caafimaadka iyo caafimaadka dhimirka, Department of Health (Waaxda Caafimaadka), iyo Department of Social and Health Services (Waaxda adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka).

Labada urur ayaa abuuray mabaadii' iyo hiigi aasaasi u ah hagida shaqadaan, kuwaasoo looga doodaayo qaybta mabaadii'da. Sharciga Early Start Act wuxuu siiyay awooda bilowga heerarka heshiiska, kaasoo keenaaya in isbadalo lasameeyo kuwaasoo taagero kagaysta iskuxirka udhaxeeya gurigga qoyska iyo WAC ga xarunta, meeshana kasaaraysa kaladuwanaanshiyaasha aan muhiimka ahayn iskuguna gaynaysa labo cutub oo kaladuwan oo WAC ah kana dhigaysa hal cutub iyo sidoo kale abuurista kobcinta hanaanka shati bixinta Early Achievers iyo ECEAP. Hanaanka iswafajinta heerarku wuxuu sidoo kale xoojinayaa shaqada Shatiyaynta oo aasaas u ah kobaca, caafimaadka iyo badqabka caruurta. Inta uu socdo hanaanka iswafajinta heerarku, dib u eegista iyo taxliilinta shuruudaha cusub ee kucad sharciga heer federaal ee daryeelka caruurta iyo muhiimadaha DCYF ee dhinacyada sinaanta isirka, ilaalinta dhaqanada, iyo caafimaadka iyo badqabka bii'ada caruurta ayaa qayb ka ah isbadelada lagu samaynaayo xeerarka Shatiyaynta.

Sawirka 1.2 ee hoos kuyaala wuxuu muujinayaa sida qaybahaas iskugu aadayaan.

SAWIRKA 1.2 HAL UNUG OO HEERARKA LA ISWAFAJIYAY AH



Xiligii dayrta sanadkii 2015, Gudigga Hagitaanka iyo Gudigga Talobixinta Gobalka oo dhan, oo kaashanaaya qaybaha kale ee gobalka, ayaa aruurshay fikradaha bulshada ee shaqadaan muhiimka ah. Wadar guud oo 22 kulan ah, ayna kaqaybgaleen Isbahsiyada 10 ah ee Early Learning Regional Coalitions (Isbahaysiga Gobalka ee Waxbarashada Caruurta Yaryar), ayaa lagu qabtay gobalka oo dhan waxana kasoo qaybgalay 1000 qof.

Wareeg kale oo lagu aruurinaayo fikradaha bulshada ayaa laqabtay sanadkii 2016, kaasoo lagu qabtay 23 kulan ayna kasoo qaybgaleen 467 qof oo matalaayay dhamaan noocyada adeeg bixiyaasha waxbarashada caruurta iyo qaybo kaladuwan oo balaaran oo dhinacyada isirka, dhaqanka, qaxootiga iyo soogalootiga, dadka daynyarta iyo kuwa wax haysta, iyo bulshooyinka luuqadaha kaladuwan. Bulshooyinka kaqaybgalay kulanadaan waxaa kamid ah, laakiin aan kukoobnayn: Ameerikaanka Dhaladka ah, Afrikaan Ameerikaan, Hispanic/Latino, Eeshiyaan, Yakama Nation, East Africa, Filipino, Qoomiyadaha Isbaanishka Kuhadla, dad Af-Soomaaliga Kuhadla, Dadka kuhadla Afka Oromada iyo Dadka af Ruushka kuhadla. Kulanada waxaa qabtay Early Learning Regional Coalitions ee 10 ka ah, waxayna si gaar ah diirada usaarayeen sinaanta isirka iyo sharafida dhaqanka.

Kadib markii laqabtay labadaan wareeg ee aruurinta fikradaha bulshada, xeerar cusub oo qabyo ah oo laxariira Shatiyaynta ayaa lasoo saaray waxaana loosoo shaaciyay in bulshadu ra'yi kadhiibato bisii Abriil 2016. Ayadoo laga raacaayo fikradaha ay bulshadu kadhiibteen, cutubyo kale oo qabyo ah ayaa lashaaciyay bishii Nufeembar 2016 mar labaad ayaana bulshada ra'yi aruurin laga sameeyay. Fikradaha bulshada ayaa soojeediyay in dib u eegisyo lagu sameeyo heerarka Shatiyaynta, arly Achievers iyo ECEAP taasoo qayb ka ah shaqada si loo xaqiijyo hormar dabacsan oo laga sameeyo laga bilaabo iyo inta udhaxaysa unug kasta oo kamid ah heerarkan.



Qayb kale oo kamid ah shaqada ayaa diirada lagu saaray Sharci Samaynta Wada hadalka (NRM), kaasoo laqabto laga bilaabo Juun 2017 ilaa Maarso 2018. Sharciga Washington (RCW 34.04.310) ayaa kadoonaaya gobalka inuu bulshada ufuro helitaanka macluumaadka laxariira abuurista sharciga maamulka uuna kor uqaado wada tashi lalayeesho dhinacyada xiisaynaaya shaqada. Sharci Buurista Wadatashiga kudhisan waxay door muhiim ah kaciyaartay shaqada wax kabadalida Shatiyaynta. Waxay kakoobantahay arimo kaladuwan:

- Kaqaybgalayaasha ayaa kala matalaaya kooxo ama masalixda dadka kulugta leh shaqada, mana ahan dad si iskood ah uga qaybgalayaa
- Dhamaan masaalixda ama kooxaha kasocda dhinacyada shaqadu qusayso waxay matalaad kuleeyihiin Wada tashiga Sharci Samaynta
- Kaqaybgalayaasha ayaa wadaaga masuuliyada labadaba hanaanka shaqada iyo natiijada kasoo baxda
- Fududeeye muhiim ah, oo ucadaalad falaaya dhamaan kaqaybgalayaasha, ayaa maaraynaaya hanaanka

- Go'aan gaaristu waxay kutimaadaa wadatashi
- Wakaalada gobalka ayaa ah unug kamid ah hanaanka NRM; kaliya maaha inay fududayso kulanada wada tashiga ah
- Natiijada kama danbaysta ah waa xeerar lasoo jeedinaayo kuwaasoo dhamaan dhinacyadu taageero kagaysan karaan



Dhamaan mawduucyada NRM waxaa lagu dhaqan galiyay Shatiyaynta. NRM waxaa kujira kooxo dhamaantood kakooban shan: kooxda xarunta; koox kasocota Head Start/ECEAP; kooxda qoyska gurigga; kooxda waalidka; iyo kooxda shaqaalaa Shatiyaynta. Hanaanka NRM wuxuu biloowday sanadkii 2017 wuxuuna dhamaaday 2018. Waxaa lagu qabtay 43 kulan, kuwaasoo 10 kamid ah ay ahaayeen wadahadal si buuxda kooxdu wada tashi ugu sameeyeen. Sharci samaynta wada tashiga kudhisan wuxuu qaatay 220 saacadood, kuwaasoo intooda badan laqabtay maalmaha fasaxa ee asbuuca si loo xaqiijiyo in dhamaan kooxuhu si buuxda kulanka usoo xaadiraan. Waxaa kujiray ugu yaraan 50 qof kooxahaan.

Intii lagu jiray hanaankii NRM, fikradaha dadwaynaha ayaa sidoo kale qayb ka ahaa, 1500 oo qof fikrado laga arurshay ayaa loosoo gudbiyay kooxaha NRM oo kakooban waalidiinta, adeeg bixiyaasha, iyo shati bixiyaasha. Fikradaha dadwaynaha ayaa lagu arurshay kulano shaqsi-shaqsi ah oo laga sameeyay Renton, Olympia, Yakima, Spokane iyo Seatac, waqti ayaana looqoondeeyay kulan kasta oo shaqsi ah oo NRM lagu qabto si shaqsiyaadka bulshada kamid ahi usoo gudbiyaan fikradahooda si shaqsi ah. Intaas waxaa siidheer, qaababka kale ee fikradaha lagu aruurinaayay waxaa kamid ah emailka, boostada Maraykanka, iyo barta webseetka ee oonleena ah. Fikradaha dadwaynaha ayaa taabanaayay qaybo kaladuwan, kuwaasoo kucad **shaxda 1.1** ee hoose.

SHAXDA 1.1 QAYBAHA FIKRADAHA DADWAYNAHA EE WADA TASHIGA SHARCI SAMAYNTA

Nooca fikrada	Sharaxaad
Muhiim ah	Fikrada noocaan ah waxay bixiyaan qaab kii hore kaduwan ama isbadal lagu sameeyo luuqada.
Soojeedin	Fikrada noocaan ah waxay bixiyaan dookhyo wanaagsan ama xun oo ku aadan sharciga mana soojeedinayso wax lagu badalo qodobka ama isbadal lagu sameeyo luuqada.
Isbadalo Farsamo	Soojeedinta noocaan ah waxay bixinaysaa isbadalo lagu sameeyo qaab dhismeedka ama naxwaha jumlada.
Nooc kale	Soojeedinta noocaan ah way kaduwantahay qaybaha kale.



Dhamaan fikradaha dadwaynaha waxaa loosiinaayay kooxaha NRM si bile ah si ay macluumaad uga helaan wada tashiyadooda. Fikradaha bulsho waynta ee lahelay loona qaybiyay kooxaha NRM waxaad kaheli kartaa barta <https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/standards-alignment/archive>


Marka ladhameeyo hanaanka NRM ta, agaasimaha Department of Early Learning ayaa dib u eegis kusameyay soojeedinada NRM kasoo baxa. Agaasimuhu wuxuu balan qaaday inuu tixgalin siinaayo shaqada NRM. Ayadoo lafulinaayo balantaan, waxaa dib u eegis lagu sameeyay shaqada ayadoo laga raacaayo baahiyaha aasaasiga ah ee caafimaadka iyo badqabka caruurta, kudhaqanka sharciga Federaalka ee daryeelka caruurta, qeexitaanka luuqada, baahiyaha adeeg bixiyaasha iyo aasaasiyaadka gobalka. Qaybta ilaha macluumaadkee buugaan tusmada ah waxaa kujira shaxda go'aanka agaasimaha.

Bishii May 9, 2018, sharciyada ayaa loosoo bandhigay in bulshadu fikrado kadhiibato lanasoo gabagabeeyo waxaana la arurshay 460 fikradood oo bulshada katimid. Fikradahaan iyo talaabooyinka ay qaado waaxdu waxay kuqoranyihiin Bayaanka Sharaxaada ee Kama danbaysta ah, oo laga akhriin karo barta

<https://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/wac-guide/Explan-Statement.pdf> Taariikhda dhaqan galinta sharciyada Shatiyayntu waa bisha Agoosto 1, 2019.

Waqtiga udhaxeeya soo gaba gabaynta heerarka iyo dhaqan galinada ayaa loo adeegsaday Ololaha Wacyi galinta ee 2018 kaasoo kakoobnaa muuqaalo, kulano oonleena ah, iyo fursado toos ah iyo barnaamijka Daadajinta ee 2019. Barnaamijyada Ololaha Wacyi galinta iyo Daadajinta Waxbarashada waxaa loogu talagalay inay diyaariyaan ayna taageeraan dhamaan shaqalaha waxbarashada caruurta (tusaale, adeeg bixiyaasha, tababarayaasha Early Achievers, shaqaalaha shatiyaynta, iwm.), ayadoo latashi iyo fikrado laga qaadanaayo adeeg bixiyaha iyo ururada iskaasiga kuleh hormarinteeda. Shaqadaan ayaa muujinaysa in isbadalada lagu samaynaayo sharciyada shati samaynta ay yihiin kuwo faahfaahsan, lagaari karo markii taageero laga baxsho, diiradana saaraaya caruurta.

SAWIRKA 1.3 SHARCIGA LACUSBOONAYSIIYAY EE SHATIYADU WAA MID FAAHFAAHSAN, LAGAARI KARO MARKII TAAGEERO LAGA BAXSHO,



DIIRADANA SAARAAYA CARUURTA.

Si fiican ufaahfaahsan: Samaynta sharciga iyo hanaanka wadatashigu wuxuu ahaa mid heer rsare oo leh heerar kaladuwan, ayna kujiraan fikradaha adeeg bixiyaasha iyo matalaada dhamaan qaybaha gobalka

Mid lagaari karo oo taageero leh: shuruucdaan waxaa lagu fulin karaa noocyo kaladuwan oo shaqooyinka iyo taageerooyinka adeeg bixiyaha ah

Diirada saaraaya caruurta: WAC waxaa lagu saleeyay cilmi baaris hadda lasameeyay dhaqan galinteeduna waxay kadigantahay natiijooyinka wanaagsan oo caruurta usoo hoyda

<https://www.youtube.com/watch?v=bqEIKbT3KZ8&feature=youtu.be>

<https://www.youtube.com/watch?v=1qDURpO2rHk>

https://www.youtube.com/watch?v=monZz58tG_0

Mabaadii'da Iswaafajinta heerarka

Gudigga Jihaynta iyo Gudigga Talobixinta Gobalka oo dhan ayaa dajiyay unugyo mabaadii' ah si loojiheeyo dhamaan heerarka iswaafajinta ee shaqada Shatiyaynta, Early Achievers iyo ECEAP. **Sawirka 1.4** ayaa muujinaaya mabaadii'da loo adeegsaday faahfaahinta shaqada.

SAWIRKA 1.4 MABAADII'DA ISWAAFAJINTA HEERARKA



Qiimayn iyo Kormeerid: qiimayn iyo kormeerid joogto ah oo lagu sameeyo heerar ayadoo la muraaqabaynaayo kudhaqanka dhinacyo kaladuwan

Hufnaanta: waxaa meesha laga saarayaa labo wajiilaynta iyo wax isdabo marinta kajirta heerarka

Wada shaqaynta bulshada: hanaanka wada shaqaynta joogtada ah ee gobalka iyo bulshada deegaanka si loohelo khibradaha dhinacyada hawshu qusayso

Ixtiraamka Dhaqanka: in laqaato mowqif isdhexgal leh oo dadka kale ixtiraamaaya (unafuran dadka kale) marka lala macaamilaayo arimaha aqoonsiga dhaqanka kuwaasoo muhiimada gaarka ah uleh [qofka]

Sinaanta iyo Qeexnaanta: abuurista luuqad fudud, toos ah oo lacabiri karo heerarka


Daaf furnaan: heerar si cad uqeehan kuwaasoo iswaaafaqsan

Sinaanta iyo saamaynta Bulshada: in laga feejignaado cadaalada darada dhinacyada isirka, dhaqanka, luuqada, iyo systemyada kale ee waxbarashada kuwaasoo saamynta kuleh bulshooyinka daldaloolka uga jira fursadaha gobalka

Mabaadii'daan ayaan laraacay dhamaan qaybaa iswaafajinta heerarka. Waxay aasaas unoqdeen isbadalada iyo fulinta shaqada laga qabtay Shatiyaynta, Early Achievers iyo ECEAP, waxaana loo adeegsaday aruurinta fikradaha dadwaynaha, dooda iyo hormarinta shaqada.

Intii lagu jiray shaqada Wada tashiga Sharci Samaynta, kooxaha wada tashiga samaynaayay waxay qeexen mabaadii'dooda gaarka ah si loo adeegsado inta uu socdo Wada tashiga Sharci samayntu. Ayadoo la adeegsanaayo mabaadii'da hore ee ay dajiyeen Gudigga Jihaynta iyo Gudigga Talobixinta ee Gobalka oo dhan, Wada tashiga Sharci samayntu wuxuu sii fududeeyay una fuliyay mabaadii'da sida hoos kamuuqata, wuxuuna arintaan u adeegsaday inay qodob marjac u ah dhamaan hanaanka Wada tashiga Sharci samaynta iyo diiradeeda ku aadan wada tashiyada lalasmaayay qaar badan oo kamid ah dhinacyada kaladuwan ee kaqaybgalayaasha ah.

SAWIRKA 1.5 ISWAAFAJINTA MABAADI'DA WADA TASHIYADA SHARCI SAMAYNTA



Tayada: sharciyadu waxay kor uqaadayaan daryeelka tayadiisu sarayso, natiijooyinka wanaagsan ee cunuga iyo qoyska, waxayna macluumaad kabixinayaan qaabka ugu fiican, waxay taageerayaan xirfada goobta shaqada iyo wada shaqaynta iyo iskaashiyada

Taageerada: Washington waxay xaqiijinaysaa taagerida adeeg bixiyaasha si ay ubuuxshaan sharciyada, loona hubiyo in sharciyada si joogto ah loofahmo looguna dhaqmo

Sinaanta: sharciyadu waxay heerar sinaan leh usameeyaan ayna aqoonsadaan kaladuwanaanta iyo qaasnimada barnaamijka


Qeexnaan: sharciyadu waxay abuurayaan luuqad fudud, toos ah oo lacabiri karo oo ay yeeshaan heerarku, waxayna kadhigaysaa kuwo qeexan oo kooban ilaa xadka macquulka ah

Dookh: sharciyadu waxay usahlayaan waalidiinta inay sameeyaan dookhyo iyo adeeg bixiyaal si ay uhelaan qaabab kaladuwan oo ay kuraacaan sharciyada shatiyaynta ayna buuxin karaan adeeg bixiyaashu

Iskaashiyada iyo Hormarinta shaqada: Licensing, Early Achievers, Early Childhood Education iyo Assistance Program

In hormar laga abuurto lagana dhex abuurto Licensing, Early Achievers, and Early Childhood Education iyo Assistance Program (ECEAP) waxay ubaahantahay iskaashiyada wada shaqayneed oo wayn. **Sawirka 1.6** wuxuu sharxayaa siday iskugu xiranyihiin qaybaha Shatiyaynta, Early Achievers iyo ECEAP gudaha hanaanka iswaafajinta.

SAWIRKA 1.6 ISKUXIRNAANTA SHATIYAYNTA, EARLY ACHIEVERS IYO ECEAP



Si aan ugaarno hormarka looga baahanyay iswaafajinta heerarka, dhamaan heerarka—haddii ay kujiraan Shatiyaynta, Early Achievers ama ECEAP—waxaa lagu sameeyay daraasayn iyo isbarbardhig. Kooxo khubaro ah, oo kakooban shaqaalaha Shatiyaynta, Early Achievers iyo ECEAP, ayaa kawada shaqeeyay siday u aqoonsan lahaayeen meelaha iskusoo laabmaaya iyo kuwa labada jeer soo laabanaaya, si loo helo khaladaadka dhanka luuqada, dib u eegisna loogu sameeyo dhamaan heerarka jira ayadoo la adeegsanaayo mabaadii da la iskuraacay kuna qoran **Sawirka 1.4**.

Sida looga dooday taariikhda kor kuxusan, daraasaadkaan waxaa lala wadaagay Gudigga Jihaynta iyo Gudigga Talobixinta ee Gobalka oo dhan. Kulano badan ayaa lala qaatay adeeg bixiyaasha, waalidka iyo bulshada si loola wadaago daraasaadka lasameeyay iyo isbadalada lasoo jeedshay in lagu sameeyo heerarka Shatiyaynta, Early Achievers iyo ECEAP.

Si loo fududeeyo hormarka loobaahanyahay in laga gaaro iswaafajinta heerarka, hal isbadal oo muhiim ah ayaa quseeya mawduuca la adeegsaday si loo qaabeeyo heerarka Shatiyaynta, Early Achievers iyo ECEAP. Sabab laxariirta iswaafajinta heerarka, isla qaybahaas ayaa loo adeegsaday Shatiyaynta, Early Achievers iyo ECEAP. Qaybaha Early Achievers ee heerarka ee loodoortay ayaa aasaas u noqdaan qaabaynta heerarka dhamaan sadexda arimood ba, taasoo waafaqsan jihaynta uu bixinaayo sharciga Early Start Act.

Shaxda 1.2 ayaa muujinaysa qaybaha loo adeegsaday dhamaan sadexda waaxood ee Shatiyaynta, Early Achievers iyo ECEAP.

SHAXDA 1.2 ISBARBARDHIGA QAYBAHA HEERARKA KADHISAN ISWAAFJINTA HEERARKA

Qaybta	Shatiyaynta	Early Achievers	ECEAP
Ujeedada iyo Maamulka	✓	NA	✓
Natiijooyinka Carruurta	✓	✓	✓
Ka qeybgalka Qoyska iyo Iskaashatada	✓	✓	✓
Tababarka iyo Kobicinta Khibrada	✓	✓	✓
Bii'ada	✓	✓	✓
Isdhaxgalada iyo Manhajka	✓	✓	✓
Maamulka Barnaamijka iyo Qaab dhismeedka	✓	NA	✓

Hormarinta iswaafajinta heerarka waxay kushaqeeyaan nidaamka Shatiyaynta iyo sidoo kale dhinacyada Shatiyaynta, Early Achievers iyo ECEAP. Qaybta Shatiyaynta, iswaafajinta kobaca ayaa si wadajir ah iskugu keenaysa qoyska iyo xarunta adeeg bixiyaasha qaab cusub, iyo natiijooyinka iswaafajinta oo leh isla hiigsi, sida kuhaboon, labadaan nooc ee adeeg bixiyaasha ah. Markay muhiim utahay adeeg bixiye qaas ah, iswaafajintu waxay aqoonsanaysaa baahida looqabo hiigsi gaar ah si markaas aysan heerarku unoqon kuwo iskusi usaameeya adeeg bixiyaha qoyska gurigga iyo adeeg bixiyaha xarumaha. Qaybaha kale ee muhiimka u ah iswaafajinta waxay raacaan mabaadii'da la iskuraacay bilowga shaqada kuna cad **sawirka 1.4**. Labo jibaarka waa lasaaray, si markaas ay adeeg bixiyaashu ufishaan in shuruudaha Shatiyaynta, Early Achievers iyo ECEAP aysan isku qasnayn. Bilowga iswaafajinta heerarka, heerar udagsan waaxda Shatiyaynta ayaa sidoo kale laga heli karaa waaxda ECEAP, tusaale ahaan. Iswaafajinta heerarka ayaa laga saaray qaybaha soo noqnoqonaaya ee Shatiyaynta, Early Achievers iyo ECEAP. Luuqad toosan ayaa lagusoo daray qaybaha Shatiyaynta, Early Achievers iyo ECEAP si markaas fikradaha iskumidka ah ay ufududaato in laga dhex aqoonsado abuurista heerarka. Isbadaladaan waxay abuuraa fursado kuwii hore kawanaagsan oo lagu taageeraayo adeeg bixiyaasha korna loogu qaado kor joogtaynta iyo muraaqabaynta ay samaynayso DCYF.

Baaritaanka dhanka kobaca ayaa tusaale wanaagsan kabixinaaya sida hormarintu ushaqaynayso.

Qaybtii hore ee iswaafajinta heerar, Shatiyaynta kuma jirin arimaha baaritaanka kobaca inkastoo labada qaybood ee Early Achievers iyo ECEAP lahaayeen. Laga bilaabo Shatiyaynta, waxaa jiro sharciyo cusub oo kahadlaaya baaritaanka kobaca. Kama doonayso barnaamijka waxbarashada caruurta inuu baxiyo baaritaanka kobaca. Waxay kadoonaysaa barnaamijka waxbarashada caruurta inuu usheego waalidiinta muhiimada baaritaanka kobaca uuna usheego waalidiinta ururada bixiya baaritaanada.

WAC 110-300-0055

Developmental screening and communication to parents or guardians.

- (1) An early learning provider must inform parents or guardians about the importance of developmental screenings for each child from birth through age five.
- (2) If not conducted on-site, an early learning provider must share information with parents or guardians about organizations that conduct developmental screenings such as a local business, school district, health care provider, specialist, or resources listed on the department web site.

Early Achievers waxay kudhisantahay hiigsiiga waaxda Shatiyaynta, waxayna bixisaa xarumo (kujira qaybta Natiijooyinka Carruurta) oo lagu sameeyo baaritaanka kobaca. Waaxda Early Achievers, yoolku waa in laxaqiijiyo in baaritaanka kobaca lasameeyo xiliyo loogu talagalay, natiijooyinka baaritaankana lala wadaago waalidiinta.

SHAXDA 1.3 KOBACA HEERARKA EARLY ACHIEVERS

Heerarka udagsan Early Achievers	Shuruudaha Heerka	Xarumaha
Baaritaanka 1 Xeer ayaa dagan si loo xaqiijiyo in dhamaan caruurta maray dhashaan ilaa da'da dugsiga barbaarinta ay maraan baaritaanka kobaca ayadoo la adeegsanaayo qalabka baaritaanka oo sax ah laguna kalsoonaan karo.	Xeerka waxaa kujira: <ul style="list-style-type: none"> • Magaca qalabka lagu baaraayo kobaca ilmaha ee saxda ah. • Habraaca sharaxaaya sida caruurta loobaraayo inta lagu jiro 45 maalmood laga bilaabo marka kobaad ee cunugu kusii biiro barnaamijka. • Sida adeeg bixiyuhu ubaari doono luuqada looga hadlo gurigga ilmaha. • In dib ubaaristu dici doonto sanad kasta. 	1 goob
Baaritaanka 2 Natiiyooyinka baaritaanada kobaca ayaa diiwaanka loogashaa dhamaan caruurta.	Natiiyooyinka baaritaanada kobaca ee saxda ah ayaa diiwaanka loogashaa cunug kasta oo kaqabgalay barnaamijka ugu yaraan 45 maalmood. Natijadaan waxaa kujiri kara qalabka saxda ah ee baaritaanka oo uu sameeyay walidka, ururka bulshada ama dhakhtarka caruurta AMA lagu sameeyay Individual Family Service Plan (IFSP, Qorshaha Adeegga Gaarka ah ee Qoyska) ama Individual Education Plan (IEP, Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah).	2 goob
Baaritaanka 3 Natiiyooyinka baaritaanada kobaca ee sanad laha ah ayaa diiwaanka loogashaa dhamaan caruurta.	Natiiyooyinka baaritaanada kobaca ee saxda ah ayaa diiwaanka loogashaa cunug kasta oo kaqaybgalay barnaamijka ugu yaraan 45 maalmood baaritaankana waxaa lagu taariikheeyaa sanad dugsiyeedkii ugu danbeeyay gudihiisa. Natijadaan waxaa kujiri kara qalabka saxda ah ee baaritaanka oo uu sameeyay walidka, ururka bulshada ama dhakhtarka caruurta AMA lagu sameeyay Individual Family Service Plan (IFSP, Qorshaha Adeegga Gaarka ah ee Qoyska) ama Individual Education Plan (IEP, Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah).	2 goob
Baaritaanka 4 Natiiyooyinka qalabka baaritaanka saxda ah waxaa lala wadaagaa qoysaska.	Natiiyooyinka baaritaanka waxaa lala wadaagaa dhamaan qoysaska ayagoo kuqoran luuqadda qoysku kuhadlo, markay macquul tahay. Tusaalayaasha waxaa kujira foomka baaritaanka ee waalidka/masuulku saxiixo ama qoraalada taariihaysan ee kayimaada shirka qoyska oo ku aadan natiiyooyinka baaritaanka.	2 goob

Barnaamijka ECEAP, baaritaanka dhanka kobaca ayaa loo baahanyahay. Inkastoo adeeg bixiyaasha ECEAP ay qasab tahay in lagu qiimeeyo heer gaar ah oo kamid ah kan Early Achievers, waayo Early Achievers waxay usahlaysaa barnaamijyada inay dood ugaar ah kayeeshaan qaabkay kuheli karaan buundooyinka laga rabo Natiijooyinka Carruurta, ECEAP waxay qasab kadhigaysaa in baaritaanka kobaca lasameeyo. Sidaas awgeed, shuruudaha barnaamijka ECEAP waxay aad ugu dhaw yihiin kuwa Early Achievers, laakiin waxay qasab kuyihiin adeeg bixiyaasha ECEAP. ECEAP waxay doonaysaa:

Qandaraaslayaashu waa inay fuliyaan baaritaanka dhanka kobaca 45 maalin gudahood, ayadoo laga bilaabaayo maalinta koowaad ee caruurta soogaan fasalka taasoo noqonaysa maalinta koobaad. Baaritaankaan waxaa loo baaanyahay halmar cunugiiba intuu kujiro ECEAP, waxaan kusii xigaaya qiimayno rubuc sanadkii lagu samaynaayo kobaca cunuga. Arimaha gaarka ah: Haddii cunugu maro baaritaanka kobaca muddo lix bilood ah gudahood kahor intuuusan bilaabin ECEAP, qandaraasluhu waa inuu layimaadaa dukumiintiyada baaritaankaas, qandaraasluhuna wuxuu adeegsan karaa baaritaankaas horay ujiray.

Ujeedada laga leeyahay baaritaanka kobaca ayaa ah in la aqoonsado caruurta ubaahan kara qiimaynta dheeriga ah ama in loo gudbiyo adeegyada gaarka ah.

Qalabka baritaanka kobacu waa inuu ahaadaa:

- Mid sax ah oo lagu kalsoonaan karo
- Mid ilaalinayaa baahiyaha dhaqanka iyo luuqada ee caruurta kadiiwaangashan xarunta iyo waalidiinta
- Uu baaraa luuqada/hadalka, dareenka-bulshanimada, jirka/dhaqdhaqaaqa, iyo kobaca dhanka fahanka

Baritaanka kobacu waa in lagu fuliyaa:

- Ogolaanshaha waalidka iyo wada shaqayntooda
- Waa inuu fuliyaa shaqaale xirfad uleh oo tababaran
- Waa in lagu sharxaa luuqada looga hadlo guriga cunuga uuna usharxaa qof laba luuqadood kuhadla oo xirfad uleh markay suuragal tahay, ama loogu sharxaa turjumaan uu lajiro saqaale xirfadle

Kadib marka ladhameeyo baaritaanka, shaqaaluhu waa inuu bixiyaa natiijada qalabka. Haddii cunug uu ubaahdo qiimaynta dheeri ah, shaqaalaha waxaa qasab ku ah:

- Inuu waalidka ugudbiyo local education agency (LEA, Wakaaalada waxbarashada ee maxaliga ah) si ay qiimaynta dheeri ah usameeyaan
- Inuu xaqiijiyo in cunugu helo qiimaynta kuhaboon iyo adeegyo kasta oo laxariira, asagoo sidoo kale qadarinaaya dookha waalidka
- Inuu iskaashi lasameeyo LEA si loo xaqiijiyo in natiijooyinka qiimaynta buuxiyaan jadwalada udagsan federaalka iyo gobalkaba

Dhamaan caruurta kujira hanaanka Individualized Education Program (IEP, Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah), Waxaa qasab ku ah qandaraaslayaasha:

- Inay codsadaan in LEA kucasuunto macalinka ECEAP kulannada IEP
- Inay taageeraan kaqaybgalka macalimiinta ECEAP si ay uga qaybgalaan kulanada IEP
- Inay qaataan nuqulka kulanka IEP
- Inay kudaraan yoolalka IEP ee cunuga qorshayntooda gaarka ah

Shaqaaluhu waa inuu qoraa taariikhaha baaritaanka kobaca, natiijooyinka, gudbinada, dabagalada, iyo taariikhaha IEP ee ELMS kujira.

Qaybta Labaad: Dulmarka Waxbarashada

Sawirka Dulmarka Waxbarashada

Dulmarka Waxbarashadu wuxuu diirada saarayaa arimaha muhiimka ah ee Foundational Quality Standards (Heerarka Aasaaska u ah Tayada ee Lacusboonaysiiyay). Anago kubilaabayna **Daaajinta**, macluumaadka ayaa labaxshaa kaasoo sharaxaaya doorarka sharciga, xeerka, iyo siyaasada iyo hanaanka shaqada ee Shatiyaynta, kuwaasoo ay lasocdaan macluumaad iyo bandhigyo muujinaaya sida xeerarka cusub oo nidaamshay, sida loo akhriinaayo, sharaxaad koobana kabixinaaya waxa kujira qayb kasta oo laga hadlaayo.

Iskuxirnaanta ayaa muujinaysa qaababka kaladuwan ee barnaamijyada waxbarashada caruurta ee kaladuwan ee shatiyada leh ay kumuujin karaan inay buuxinayaan imilooyinka u taagan Heerarka Aasaaska u ah Tayada. Afar qaab ee lagu adeegsado Heerarka Aasaaska u ah Tayada ayaa kala ah xeerka, shaqada, dukumiintiyada, iyo tababarka. Tusaalayaal ayaa labixinaaya.

Joogtaynta Ujeedada waxay kahadlaysaa xaalaha qeexaaya in luuqada Heerarka Aasaaska u ah Tayada wax laga badalay laakiin mawduuca iyo ujeedadu wali isla kuwii yihiin. Qaybtu waxay sheegaysaa sababta luuqada wax looga badalay, waxayna bixinaysaa tusaalayaal kaladuwan.

Kaladuwanaanta iyo Kadhaafida waxay kahadlaysaa sida barnaamijyada waxbarashada caruurta ucodsan karaan loona siin karo in laga dhafo Heerarka udagsan Aasaaska Tayada. Kaladuwanaanshuhu waa qaab cusub oo lagusoo daray Heerarka Aasaaska u ah Tayada, taasoo usahlaysa koox kamid ah barnamijyo iskumid ah inay helaan kaladuwanaanso. Kadhaafidu horay ayay muddo uga jirtay waaxda Shatiyaynta waxayna siinaynaa barnamijyo gaar ah inay codsadaan in shuruudaha laga dhafo.

Qaybta ugu danbaysa ayaa faahfaahin kooban kabixinaysa **Hormarinta Xirfada iyo Tababarka**, ayna kujiraan macluumaad kooban oo kusaabsan xirfadaha shaqaalaha, shuruudaha tababarka iyo waqtiyada udagsan dhamaystirkooda, ee shuruudaha tababarada adeegyada, iyo shahaadooyinka iyo digriiyada laxariira. Liiska hubinta xirfadaha ee shaqaalaha waxbarashada cauruurta yaryar ee kashaqaynaaya doorarka soosocda ayaa kujira: shaqaalaha haysta shatiga daryeelka gurigga ee shatiga leh; agaasimaha xarunta, kaaliyaha agaasimaha, iyo kormeeraha barnaamijka; macalinka hogaanka; kaaliyaha macalinka; kaaliyaha; iyo mutadwaca.



Daadajinta Shatiyaynta Heerarka Aasaaska u ah Tayada

Sharciyada iyo Xeerarka

Gobalka Washington, Shatiyaynta barnaamijyada waxbarashada caruurta waxaa lagu maamulaa 3 qaab:

- **Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Cusub ee Washington):** oo ah maamulka sharciga ee Shatiyaynta
- **Washington Administrative Code (WAC, Sharciga Maamulka ee Washington):** oo ah xeerarka dhaqangalinta Shatiyaynta
- **Policies and Procedures (Xeerarka iyo Hanaanada shada):** jihaynta iyo taageerada sharciyada dhaqangalinta Shatiyaynta

RCW: The Revised Code of Washington (RCW) waa sharciyada la ansixiyay, ee rasmiga ah ee Washington. Waxay baxisaan maamulka sharciga ee Shatiyaynta barnaamijyada waxbarashada caruurta. Cutubka [43.216](#) RCW ayaa bixinaysa awooda iyo waajibaadka DCYF ee ah inay dajiso oo fuliso shuruudaha Shatiyaynta iyo Heerarka Early Childhood Education and Assistance Program (ECEAP). Waxaad kabaari kartaa sharciyada RCW lifaaca soosocda: <http://apps.leg.wa.gov/rcw/>


WAC: Shuruudaha shati bixinta ayaa uqoran inay noqdaan xeerarka qaybta ka ah Washington Administrative Code (WAC, Xeerka Maamulka Washington). Xeerarkan waxay shuruudo cad udajiyaan kashaqaynta barnamijka waxbarashada caruurta oo shati leh. WAC waa isha aasaasiga u ah macluumaadka xeerarka Shatiyaynta shaqaalaha ee barnamijka waxbarashada caruurta.

Cutubka WAC ee kahadlaaya Shatiyaynta waxbarashada caruurta waa Cutubka 110-300 WAC, Heerarka Aasasiga ah ee Tayada. Waxaad kabaari kartaa cutubka 110-300 WAC adoo raacaay lifaaqaan: <http://apps.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300>

Xeerarka iyo Hanaanada: Si loosharxo ama gacan looga gaysto bixinta tasmada iyo taageerida dhaqangalinta xeerarka Shatiyaynta, DCYF waxay sidoo kale abuurii kartaa xeerar, hanaano, shaqooyin, ama qaabab laxariira Heerarka Aasaasiga ah ee Tayada.

Xariirka kadhaxeeya RCW, WAC, iyo Xeerarka iyo Hanaanada Shatiyaynta hoos ayaa lagu muujiyay.

SAWIRKA 2.1 QAAB DHISMEDKA MAAMULKA XEERARA SHATIYAYNTA



Dhaqaajinta Heerarka Aasaaska u ah Tayada

Heerarka Aasaaska u ah Tayada ee Barnaamijyada Waxbarashada Caruurta, Cutubka 110-300 WAC ayaa ah isha aasaasiga ah xeerka barnaamijyada waxbarashada caruurta, ayadoo isbadelka lagu sameeyo dhaqan galaayo bisha Agoosto 1, 2019. Heerarka Aasaasiga u ah Tayada waxaa layskugu geeyaa 7 qaybood oo waawayn, taasoo usahlaysa isticmaalayaasha inay si fudud kuhelaan macluumaadka. Todobada qaybood ee waawayn waxaa kamid ah: Ujeedada iyo Maamulka; Child Outcomes; Wada shaqaynta Qoyska iyo Iskaashatada; Horimarininta Xirfada, iyo Shuruudaha iyo Tababarada; Bii'ada; Isdhaxgalada iyo Manhajka, iyo Maamulka Barnaamijka iyo Kormeerida,

Qaybahaan waxaa kamid ah qaybo kakooban xeerarka quseeya labadaba noocyada adeeg bixiyaasha waxbarashada caruurta, qoyska gurigga iyo xarunta. Qaybaha ayaa sii ahaan kara qaybo hoosaadyo. Tusaale, waxaa jiro qayb hoosaadka "Dhalaanka iyo Caruurta" oo kuhoos jira qaybta "Bii'ada". Sharaxaadaha qaybaha waawayn waxaad kahelaysaa qaybta Barashada Heerarka Aasaaska u ah Tayada.

Gudaha qayb, xeerarka waxaa layskugu xijiyaa tiro ahaan (1, 2, 3, iwm.) waxayna lahaan karaan qaybo hooseed (a, b, c, iwm.).

Si loosoo xigto xeer gaar ah, waxaa suuragala ah in laqoro nambarka cutubka (110-300), kaasoo lagu xijiyo jitin kadibna nambarka qaybta, kadibna lasii raacinaayo nambarka xeerka oo labo qaws kudhexjira. Haddii aad doonayso, waxaad kudari kartaa xarafka qayb hoosaadka adoo kuxijinaaya nambarka xeerka ee qawska kujira.

Tusaale: 110-300-0100 (1)(a)



WASHINGTON STATE LEGISLATURE

WACs > Title 110 > Chapter 110-300 > Section 110-300-0100 Print

Legislature Home	110-300-0085 << 110-300-0100 >> 110-300-0105
House of Representatives	
Senate	
Find Your District	
Laws & Agency Rules	Agency filings affecting this section
Bill Information	
Agendas, Schedules, and Calendars	
Legislative Committees	
Coming to the Legislature	
Legislative Agencies	
Legislative Information Center	
Email Updates (Gov/Delivery)	
View All Links	

WAC 110-300-0100
General staff qualifications.

All early learning providers must meet the following requirements prior to working:

(1) **Family home early learning program licensees** work from their private residence to provide early learning programing to a group of no more than twelve children present at one time.

(a) A family home licensee must meet the following qualifications upon application:

- (i) Be at least eighteen years old;
- (ii) Have a high school diploma or equivalent; and
- (iii) Complete the applicable preservice requirements pursuant to WAC 110-300-0105.

SAWIRKA 2.2 SOCODSIINTA HEERARKA AASAASKA U AH TAYADA, CUTUBKA 110-300 WAC

QAYBTA LABA:
DUL KA HEGISTA AOOONTA

CHAPTER
110-300
Foundational quality standards for early learning programs

7 Sections
inform the organization of the chapter

Sections 0001-0030
Intent and Authority

Sections 0055-0065
Child Outcomes

Sections 0080-0085
Family Engagement and Partnerships

Sections 0100-0120
Professional Development, Training and Requirements

Sections 0130-0296
Environment

Sections 0300-0360
Interactions and Curriculum

Sections 0400-0505
Program Administration and Oversight


Each section has a title and the numbered regulations

Each Section has a title and the numbered regulations

Section 0100
Staff Qualifications

- (1) Family home early learning program licensees
- (2) Center early learning program licensees

Example of a regulation reference number



Barashada Heerarka Aasaaska u ah Tayada

Si ay gacan fiican kuusiisayso inaad baanayso xeerarka Shatiyaynta, 7 qaybood iyo qayb hoosaadyada hoos ayaa lagu qeexay.

Ujeedada iyo Maamulka

Qaybaha 0001-0030

Ujeedada iyo Maamulka waxaa looga hadlaa maamulka fulinaaya xeerarka Shatiyaynta iyo sidoo kale ujeedadiisa. Waxay sharaxaysaa erayada la adeegsanaayo dhamaan inta laga hadlaayo cutubka 110-300 WAC. Qeybtaan sidoo kale waxay dabooshaa noocyada barnaamijyada u baahan shatiyada ama barnaamijyada laga dhaafay shatiyaynta.

Natiijooyinka Carruurta

Qaybaha 0055-0065

Natiijooyinka Carruurta waxaa si kas ah loodhigaa biloowga Cutubka 110-300 WAC si diirada loosaaro caruurta. Ujeedada xeerarka Shatiyayntu waa in lasoo saaro natiijada ilmaha oo tii hore kafiican.

Qeybtaan waxay qeexdaa filashooyinka kusaabsan baaritaanka hormarinta, diyaarsanaanta dugsiga iyo ku meelgaarka dugsiga barbaarinta. Mawduucyada waxaa kujira ku xirida qoysaska illaha bulshada sida barnaamijyada barashada ee la xiriira qoysaska ee ku saabsan muhiimada iyo helitaanka baaritaanka hormarinta iyo kumeelgaarka dugsiga barbaarinta si sare loogu qaado natiijooyinka carruurta.

Ka qeybgalka Qoyska iyo Iskaashatada

Qaybaha 0080-0085

Labo qaybood--qiimaynta gaarka ah ee taageerada qoyska iyo iskaashiga iyo xariirka qoyska—ayay kakoobantahay qaybta Wada shaqaynta Qoyska iyo iskaashiyada.

Qaybtaan waxay kuqorantahay qaybaha hore ee xeerarka waayo waxay muujinaysaa in qoysasku yihiin macalimiinta ugu muhiimsan ee caruurtooda. Xeerarkan waxay wado siinayaan adeeg bixiyaasha waxbarashada caruurta si ay ukaashadaan qoysaska si markaas loohelo natiijayada ugu saraysa ee caruurta keenaan. Sharciyadaan waxay dajiyaan sharuudaha xiriir bixiyayaasha iyo waalidiinta si ula kaashadaan daryeelkooda carruurta. Waxay sidoo kale qeexayaan filashooyinka is-qiimeynta barnaamijka ee aaga taageerada qoyska.

Hormarinta Xirfada, Tababarka iyo Sharuudaha

Qaybaha 0100-0120

Filashooyinka adeeg bixiyayaasha waxbarashada caruurta ee aagaga muhiimka ah oo ay ku jiraan u qalmida shaqaalaha, tababarka, xeerarka barnaamijka iyo nidaamyada ee dabagalka shaqaalaha iyo kormeerida, diiwaan-haynta, iyo taageerada kale ee shaqaalaha ayaa looga hadlayaa qaybta Hormarinta Xirfada, Tababarka iyo Sharuudaha.

Kala duwanaanshaha kajira goobaha waxbarashada caruurta waxaa lagu tixgeliyay, kala duwanaanshaha u dhaxeeyo qoyska guriga iyo sharuudaha xarunta waxbarashada caruurta sida ku haboon. Sabab laxariirta iskuxirnaanta tooska ah ee udhaxaysa tayada shaqaalaha iyo natiijooyinka caruurta, hormarinta xirfada iyo tababarka waxay horyaal uyihiin Heerarka Aasaaska u ah Tayada, Cutubka 110-300 WAC.



Bii'ada

Qaybaha 0130-0296

Qaybta bii'ada ayaa ah qaybta ugu wayn Heerarka Aasaaska u ah Tayada, Cutubka 110-300 WAC Himilooyinka iyo shuruudaha kusaabsan bixinta goob waxbarasho oo leh badqab, caafimaad, iyo waxbarasho ayadoo latixgalinaayo gaarnimada xarumaha qoysa gurigga iyo xarunta waxbarashada caruurta labadaba waa latixgalinayaa. Qaybta bii'ada waxaa diirada lagu saarayaa badqabka iyo caafimaadka deegaanada kuxeeran caruurta, taasoo saamayn kuleh hormarkooda iyo guushooda. Caruurta waa inay noqdaan kuwo badqaba oo kobac saaynaaya.



Isdhaxgalada iyo Manhajka

Qaybaha 0300-0360

